

Ma u baahan tahay taageero dheeraad ah si aad dugsiga uga gudubto ama aad u gasho marxalada shaqada? Markaa SKRUVAS waxay noqon kartaa jidka loo maro!

Kuwa da'doodu u dhaxayso 13–17

Adiga aadaya dugsiga sare waxa aad taageero dheeraad ah ka heli kartaa iskuduwaha iyo/ama SYV dugsiga ka hor iyo inta lagu jiro dugsiga sare. Inta lagu jiro sanadka 9, waxaad baraneysaa qof xiriiriye ah oo jooga dugsiga sare oo kula shaqeeya adiga iyo SYV si loo hubiyo si aad taageero fiican uga hesho waxbarashadaada sii socota. Hadafku waa inaad dareento amaan markaad dugsiga hoose dhameysato oo aad bilowdo dugsiga sare.

Kuwa da'doodu u dhaxayso 18–24

SKRUVAS, isku-duwayaasha mashruuca waxay la shaqeeyaan isku-duwaha KAA (mas'uuliyadda waxqabadka degmada) iyo shaqaalaha dugsiga. Waxaad helaysaa isku-duwe kuu gaara kaas oo ku siinaya taageero si aad ugu gudubto dugsiga sare una gudubto waxbarasho ama marxalada shaqda. Hadafka ayaa ah inaad dareento kalsooni mustaqbalka markaad dhammayso dugsiga sare.

SKRUVAS waxaad kartaa inaad:

- ka hesho caawin khariidaynta/darasadaynta fursadahaaga iyo meelaha aad ku fiican tahay
- sahamiso danahaaga iyo rabitaankaaga
- taageero ka hesho waxbarashadaada
- caawimo hesho si aad u raadsato shaqo ama goob shaqo barasho (praktikplats)



**Medfinansieras av
Europeiska unionen**

SKRUVAS waa mashruuc ay maalgeliso sanduuqa bulshada ee Yurub waxaana iska leh degmada Växjö.

Mashruuca waxaa la sii mariyaa qaybta mashruuca Kronoberg waxaana lag fuliyaa Alvesta, Lessebo, Ljungby, Uppvidinge, Tingsryd, Växjö, Markaryd iyo degmada Älmhult.

Su'aalo

Haddii aad hayso su'aalo, waxaad ku soo diri kartaa emailkan: projektenhetkronoberg@vaxjo.se

Tani waa SKRUVAS

Mashruuca SKRUVAS wuxuu ku siin doonaa taageero qoto-dheer sidoo kale wuxuu horumarin doonaa hababka la xoojiyey ee KAA (mas'uuliyadda waxqabad ee degmooyinka) ee horeba uga soo bilaabmayay fasallada 7-9 iyo ka dib dugsiga sare.

Yaa ka qayb qaadan kara SKRUVAS?

SKRUVAS waxay wax la qabataa dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 13-24 ee u baahan taageero shakhsiyeed oo isku dubaridan marka ay u gudbaan marxaladaha dugsiga iyo ka soo noqoshada dugsiga ilaa marxalada shaqada.

Sidee u dhacdaa?

SKRUVAS, KAA iyo isuduwayaasha dhalinyaradu waxay si dhow ula shaqeeyaan dugsiyada hoose iyo sare si loo aqoonsado da'yarta u baahan taageero la isku duba riday goor hore.

Lakulanka isku-duwaha dhalinyaradu meelaha loo sii mari karo waxa ka mida KAA, kaalmada dhaqaalaha/cayrta iyo dugsiga sare.



Alvesta
kommun



Lessebo
kommun



Ljungby
kommun



MARKARYDS
KOMMUN



UPPVIDINGE
KOMMUN



Tingsryds
kommun



Växjö
kommun



Älmhults
kommun